



Arbeitszeit

Working hours Heures de travail Jornada laboral
Рабочее время ሰዓታት ስራሽ Saacadaha shaqada
ساعات العمل ساعات کار

Know your rights!
Quels sont mes droits?
¿Cuáles son mi derechos?
Какие у меня права?
እንታይ እዮም መሰላተይ:
Махаан хақ u leeyahay?
ما هي حقوقي؟
حقوق من چیست؟

Was sind meine Rechte?



Mararka qaar adiga iyo shaqo-bixiyaha isku aragti kama noqoneysaan inta saacadood ee aad shaqeysay. Marka haddii aad dooneyso inaad dalbato lacagta saacado aad shaqeysay waa muhiim inuu qofka ogaadaa inta uu shaqeeyay. Sidaas darteed waxaan soo jeedineynaa inuu qofku shirkadda ku xisaabsado ama si iskiis ah u xisaabsado inta uu shaqeeyay. Waxaan kaloo kugu caawin karnaa diiwaan aan kuu diyaarinay oo lagu xisaabsan karo saacadaha. Waxaad ku qoran kartaa toddobaadyada iyo maalmaha shaqada iyo shaqo-hakinta ama biririfta oo kala saaran. Saacadaha aad qoratay ayaad kaddib la barbar-dhigi kartaa xisaabta lacageed ama lacagta kuu timid. Marka xisaabtaada saacadaha iyo xisaabta lacagta aad meel wada dhigato, waxaa dib u tixraaci kartaa marka ay dhibaato ka timaado. Marka shaqo wareegto ah lagu diro ama shaqaalaha ammaahda, way ku caawineysaa inaad qorto halka aad ka soo shaqeysay, madaama ay inta badan is-bedbedesho.

Marka uu ku galo dareen, in xisaabtaada mushaarka aysan sax ahayn, Aan kula talinno!

Xilliga shaqada

Jarmalka, Xeerka ayaa sharciyeeyay ugu badnaan inta saacadood ee uu qofku shaqeyn karo maalinta iyo toddobaadkaba. Xilliga shaqada ee maalintii waxaa ugu badnaan ku dhigan 8 saacadood. Xilliga shaqada waxaa celcelis ahaan la oggol-yahay in la kordhiyo kaliya marka 24 Toddobaad ama 6 bilood aanay saacadaha shaqada ka badan maalintii siddeed saacadood. Xilliga shaqo waxaa sidoo kale la oggol-yahay in 10 saacadood aysan ka badan maalintii. Xirfado gaar ah baaan xeerkan loo eegin. Aan kula talinno!

Biririfta

Biririfta ama hakinta shaqada lacag laguma bixiyo. Qofka, marka 6 saacadood ka badan uu maalintii shaqeeyo, waa inuu ugu yaraan 30 daqiiqo oo Biririf ah helaa. Qofka, haddii uu 9 saacadood ka badan uu shaqeeyo, waa inuu 45 daqiiqo hakiyaa shaqada. Waxaa sidoo kale la oggol-yahay in Biririfta la kala qeybiyo; balse waa in ugu yaraan Biririf kasta ay 15 daqiiqo la ekaato. Qofka xaq ayuu u leeyahay Biririfta shaqada. Waxaa suuragal ah in shirkadaha qaar Biririfta ay dheer-tahay ama wakhti loo gooyay. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato, kahor inta aadan shaqada billaabin, xilliyada Biririfta aad qaadan karto.

Xilliga nasiinada

Shaqada kaddib, qofku waa inuu helaa wakhti ku filan, si uu u nasto. Sidaas darteed xeerka ayaa dhigaya in qofka, marka uu shaqada dhameeyo, uu ugu yaraan 11 saacadood firaqo helo, kahor inta aanu shaqada dib u billaabin ama ugu laaban. Xirfadaha qaarkood baase xeerkan loo eegin.

Saacadaha dheeriga ah

Haddii shirkadda ay jirto shaqo ka badan intii la qorsheeyay waxaa qofka madaxda ah uu nidaamin karaa saacado shaqo oo dheeri ah. Tusaale ahaan: Waxaad caadiyan shaqeysaa 7 Saacadood maalintii. Waxaa maalin la nidaamiyay inaad 10 saacadood shaqeeyso. Saddexdaan saacadood waa Saacado dheeri ah. Saacadahan dheeriga ah waa in sidoo kale lagu lacageeyaa ama wakhti firaqo ah lagu siiyaa. Waase in marka horeba dadka madaxda ah ay nidaamiyaan.

Xisaabta saacadaha shaqo

Kunturaadda – ama heshiiska shaqada, waxaa ku dhigan inta saacadood ee ay tahay inaad toddobaadkii shaqeeyso. Mararka qaarse saacado dheeri ah ayay tahay inaad shaqeeyso. Marka loo eego shirkadaha qaar, waxaa laga yaabaa in

saacadahan dheeriga ah lagu qoro Xisaabta saacadaha shaqo (AZK). Shaqaalaha ammaahda (Zeitarbeit) waxaa mar kasta jira Xisaabta saacadaha shaqo. Tusaale ahaan: Waxaad toddobaadkii leedahay 35 saacadood oo shaqo ah, balse shirkad baa laga yaabaa inay u degsan tahay in 40 saacadood toddobaadkii la shaqeeyo. Shanta saacadood waa dheeri- ama Saacado dheeri ah, waxaana lagu qorayaa Xisaabta saacadaha shaqo. Qofka ama waxay u noqoneysaa fasax maalin kale ama waa loo lacageynayaa. Ugu dambeyn marka xaaladda shaqo ay dhammaato, wuxuu sheegan karaa in dhammaan saacadaha u yaalla loo lacageeyo.

Wakhtiga kama dambeysta

Kunturaadda shaqada ama Heshiiska sicirka aagga waxaa ku xusan wax loogu yeero Wakhtiga kama dambeysta ah (Ausschlussfrist / Verfallsfrist). Tani waxaa lagu macneeyaa, in qofka uu heysto wakhti cayiman, si uu qalad xisaab-dejinta ah ama dalab lacageed u gudbiyo. Caadiyan wakhtigaas waa saddex bilood. Waxaa laga wadaa tusaale ahaan: Marka lacagta kuu timaado ay ka yar-tahay intii aad shaqeysay, waxaad heysataa muddo 3 bilood, si aad u dalbato saacadaha maqan lacagtooda.

Wakhti xisaabsasho

Saacad kasta, ee uu qofka shaqeeyay, waa inuu shaqo-bixiyaha lacageeyaa. Mararka qaar, waxaa laga yaabaa in shaqo-bixiyaha aanu wax shaqo ah kuu heynin, tusaale ahaan Shaqaalaha Ammaahda (Leiharbeit). Balse marka saacado shaqo oo cayiman ay ku qoran yihiin Kunturaadda shaqada, adiguna aad diyaar u tahay inaad shaqeeyso, shaqo-bixiyaha waa inuu saacadahaas kuu lacageeyaa. Sidaas darteed macno ayay sameyneysaa inaad shaqo bixiyaha u sheegto inaad diyaar u tahay inaad shaqeeyso.

Diiwaanka shaqada Arbeitszeit- erfassung

- | | | |
|--|----|--------------------------------------|
| Magaca | 1 | Name |
| Toddobaadka | 2 | Kalenderwoche |
| Bisha | 3 | Monat |
| Maalinta | 4 | Tag |
| Shaqo-billowga | 5 | Arbeitsstart |
| Shaqo-dhammeynta | 6 | Arbeitsende |
| Birirfta /
Shaqo-hakinta | 7 | Pausen |
| Saacadaha shaqada | 8 | Arbeitsstunden |
| Goobta
Howsha
Tacliq | 9 | Einsatzort
Tätigkeit
Anmerkung |
| Wadarta saacadaha | 10 | Gesamtstunden |
| Inta ka ah
Saacado dheeri ah
Saacadaha lagu
daray | 11 | davon
Überstunden
Plusstunden |
| Saacadaha laga
jaray | | Minusstunden |

Anerkennungs- und Qualifizierungsberatung

Sie möchten in Deutschland arbeiten? Sie möchten Ihren ausländischen Abschluss anerkennen lassen? Wir beraten Sie zur Anerkennung Ihres ausländischen Abschlusses und unterstützen Sie beim Antrag. Wir beraten auch zu passenden Qualifizierungen.

Sie finden die IBATs (Informations- und Beratungsstellen Anerkennung Thüringen) in Mühlhausen, Eisenach, Erfurt, Jena, Gera und Meiningen. Wir beraten in ganz Thüringen.

Die Beratung erfolgt online, telefonisch oder persönlich. Die Beratung ist kostenfrei. Die Kontakte finden Sie unter www.iq-thueringen.de/iq-beratung/aner kennungs-und-qualifizierungsberatung.

Das Förderprogramm »Integration durch Qualifizierung (IQ)« zielt auf die nachhaltige Verbesserung der Arbeitsmarktintegration von Erwachsenen mit Migrationshintergrund ab. Daran arbeiten bundesweit Landesnetzwerke, die von Fachstellen zu migrations-spezifischen Schwerpunktthemen unterstützt werden. Das Programm wird aus Mitteln des Bundesministeriums für Arbeit und Soziales (BMAS) und des Europäischen Sozialfonds (ESF) gefördert. Partner in der Umsetzung sind das Bundesministerium für Bildung und Forschung (BMBF) und die Bundesagentur für Arbeit (BA).

Impressum

Herausgeber

DGB-Bildungswerk
Thüringen e.V.
Schillerstraße 44
99096 Erfurt



Gestaltung und Satz

Franziska Stübgen,
Titel-Grafik basierend auf einem Entwurf
von Bohdan Burmich (the Noun Project)

Druck

Fehl Druck, Erfurt

Übersetzungen

Arabisch – Joudat Nasra
Dari – Zaki Farooqi
Russisch – David Usubian
Tigrinya – Fkreyesus Ghebreyesus
Französisch – Kristin Fischer
Englisch – Kristin Fischer
Somali – Tahlil Olad Hassan
Spanisch – Iolanda Benzo Pflug

Erfurt, April 2020

Das Förderprogramm »Integration durch Qualifizierung (IQ)« wird durch das Bundesministerium für Arbeit und Soziales und den Europäischen Sozialfonds gefördert.



Zusammen. Zukunft. Gestalten.



In Kooperation mit: